SOMALI

# KU SOO DHAWOOW MAKTABADA DADWEYNAHA PORTLAND!




## KU SOO DHAWOOW MAKTABADA DADWEYNAHA PORTLAND (PORTLAND PUBLIC LIBRARY, PPL)!

Waan ku faraxsanahay inaad nagu soo biirtay. Waxaad u isticmaali kartaa kaarkaaga inaad ka amaahato buugaagta, buugaagta maqalka ah, filimada, muusiga, ciyaaraha fiidyaha, iyo majaladaha-sidoo kale mikroskoobyada, telescopes, meelaha WiFi-ga ah, xirmooyinka tacaburka, iyo in ka badan. Kaarkaagu waxa kale oo kuu ogolaanayaa inaad isticmaasho agabka intarneedka ee PPL, oo ay ku jiraan ebook-ga la soo dajin karo iyo buugaagta maqalka ah, iyo sidoo kale kombiyuutaradayada dadweynaha. Waxaan ku haynaa in ka badan 400,000 oo shay oo ku yaala afartayada dhismo iyo moobiiladayada buugaagta, laakiin haddii aadan ka heli weydo waxaad u bahaan tahay khaanadahayada, waanu ku faraxsanahay inaan isku dayno inaan kaaga helno maktabad kale oo ku taal gudaha Maine ama dalka oo dhan.

## SIDEE BAAN WAX U AMAAHDAA?

Markaad hesho wax aad amaahato waxaad keentaa kaarkaaga, keen miiska amaahda ama mishiinka is-hubinta. Haddii aadan haysan kaarkaga, waxaan u baahnaan doonaa inaan ku aragno aqoonsigaaga miiska amaahda.

## IMMISA SHAY AYAAN KA AMAAHAN KARAA?

Inta badan waxyaabaha, waxaad ka bixin kartaa inta aad la socon karto. Laakiin waxaad qaadan kartaa hal ciyaar oo fiidiyoow ah markiiba.

## ILAA INTEE AYAAN SII HAYN KARAA?

Buugaag, CD-yada, iyo ciyaaraha fiidyaha waxa qaadan kartaa 3 toddobaad, laakiin DVD-yada iyo majaladaha waxaad qaadan kartaa 1 toddobaad oo keliya. Faahfaahin dheerad halkan ka eeg: **www.portlandlibrary.com/borrowing-chart/**

## KA WARAN HADDII AY WAKHTI DHEER IGU QAADATO INAAN AKHRIYO/DAAWADO/CIYARO/DHAGEYSTO?

Ilaa iyo inta aan cid kale sugin iyo muddo dheer aadan haysanin. Haddii aad u baahan tahay caawimaad, booqo ama wac Miiska Amaahda meel kasta inta lagu jiro saacadaha furan. Waa inaad noo sheegtaa barcode kaarkaaga si aad ugu cusboonaysiiso taleefanka.

Inta badan alaabta PPL waxaa la cusboonaysiin karaa laba jeer. Alaabaha ka yimaado maktabaha kale oo ku yaalo Maine waxa la cusboonaysiin karaa hal mar oo kaliye, iyo alaabta ka baxsan gobolka lama cusboonaysiin karo gabi ahaanba.

## XAGGEE KU CELIN KARAA WIXII AAN AMAAHDAY?

Ku soo celi alaabta aad amaahatay maktabad kasta adigoo ku soo ridaya miiska amaahda ama meelaha buugaagta bannaanka ah, ama baabuurka buugaagta xili ay soo marto xaafadaada. Alaabta la soo celiyo xili aan xidhno maktabada waxaa la eegi doonaa maalinta ku xigto markii dhismuhu furmo.

## SHAYGII AAN RABAY WAXAA QAATAY QOF KALE. MA GELI KARAA LIISKA SUGITAANKA? KA WARRAN HADDAANAN TAGI KARIN MEESHA LAGU HAYO?

Waxaad isticmaali kartaa shabakadayada si aad u qabsato buug soo baxay ama la dalbaday, ama waxaanu kuugu farxi doonaa inaanu kuugu samayno telefoon, shakhsi ahaan, ama lending@portlib.org. Waxaad sidoo kale codsan kartaa buug meel kale ah in lagugu soo diro xaruun adiga kuu habboon. Waxay qaadan kartaa dhowr malmood. Xaalad kastaba, waxaanu ku sheegi doonaa marka dalabkaagu diyaar u yahay iyo goota aad soo qaadan karto. Si aad u hesho xiriir degdeg ah, hubi inaad na siisay ciwaanka iimaylkaaga. Haddii kale, waxaan ku soo diri doonaa warqad boostada.

*MUHIIM: Ma siin karno alaab cid kale marka laga reebo qofka codsaday. Haddii aad rabto inaad soo dirto qoys ama saxiid si ay u soo qaadaan waxaad dalbatay, waxaad soo siisaa kaarka maktabadda ama nuqul ka mid ah iimaylkaaga ama warqadda sheegaya inay diyaar tahay qaadista (koobiga lagu soo gudbiyay telephonka waa caadi).*

## MAXAA DHACAYA HADDII AAN KA DAAHO SOO CELINTA WIXII AAN AMAAHDAY?

Waxaan fileynaa in alaabta la amaahday in lagu soo celiyo waqtigii loogu talagalay, laakiin kuma dalacno khidmadaha daahsoon. Si kastaba ha ahaatee, haddii shay aan la soo celin, waxaan kugu dallaci doonaa beddelkiisa. Soo celinta alaabta lagugu dalacay waxay tirtiraysaa biilka, waxna kuma yeelan doontid. Hadii lagugu leeyahay wax ka badan $5.00, ma amaahan kartid ama dib uma cusboonaysiin kartid alaabta ilaa aad soo celisid ama kharashka la bixiyo.

## MAXAAN KU SAMAYN KARAA KAARKAYGA INTERNETKA?

Adigoo isticmaalaya nambarkaaga barcode iyo PIN-kaaga, waxaad ku samayn kartaa profile ku jira buugaheena. Halkaa ka dib, waxaad kala socon kartaa waxaad amaahatay, oo aad cusbooneysiin kartaa oo aad alaab ka codsan kartaa marka maktabadda la xiro. Waxaad kale oo aad isticmaali kartaa barcode-kaaga si aad isaga diiwaan geliso cloudLibrary si aad u soo dejiso buugaag iyo buugaagta maqalka iyo si aad u hesho ilo kale oo badan oo elegtaroonig ah.

## MAXAA DHACAYA HADDII AY DHIBAATO IGA HAYSATO ISTICMAALKA KAARKA KHADKA INTERNETKA?

Fadlan na soo wac, waana ku farxi doonnaa inaan ku caawinno!

## SIDEEN KU HELI KARAA?

- Iimayl wakhti kasta ah **lending@portlib.org**
- Su'aalaha ku saabsan alaabta meelo gaar ah, wac goobtaas:

| Burbank Branch | Downtown Library | Peaks Island Branch | Riverton Branch |
|---|---|---|---|
| (207) 774-4229 | (207) 871-1700 | (207) 766-5540 | (207) 797-2915 |

- Si aad wax u cusbooneysiiso, wac **miiska amahda** (207) 871-1700 x730
- Dhibaato xaga gelitaanka astaantaada, wac **miiska amaahda** (207) 871-1700 x730
- Su'aalaha ku saadsan cloudLibrary, wac **La-talinta akhristayaasha** (207) 871-1700 x705
- Si aad wax u dhigto, wac **La-talinta Akhristayaasha** (207) 871-1700 x705
- Su'aalaha ku saabsan adeegsiga xogtayada, wac **Tixraaca (Reference)** (207) 871-1700 x725
- Su'aalaha ku saabsan taariikhda deegaanka, wac **Qolka Portland (Portland Room)** ee (207) 871-1700 x747

**PORTLANDLIBRARY.COM**